

Bukaanka Qaaliga ah

Xanuunka iyo daweyntuba waxay saamayn karaan ladnaanta jirkeenna, dareemaheenna, iyo dhaqaalaheenna.

Su'aalaha soo socda waa qayb ka mid ah Baarista Walbahaarka. Jawaabahaagu waxay caawinayaan in kooxda daryeelkaaga caafimaad ay ogaadaan meelaha kooxaheenna kala duwani ay caawinaad dheeraah ah kaa siin karaan. Waa muhiim inaad su'aalahan aad ka jawaabtid xilliga ugu sokeysa ee kuugu habboon.

Mayo Clinic waxay bixisaa daryeel dhammeystiran sidaas daraaddeed waxaa laga yaabaa in kooxda daryeelkaagu ay ka mid yihiin dikrtoor, diktoor caawiye, kaalkaalis wax daweyso, kalkaalis, diktoorka dhimirka, diktoorka cilmi-nafsiga, caawiyaha bulshada, khibradlaha nafaqaynta, la taliyaha dhaqaale, hagaha bukaanka, daryeel-bixiyaha diinta, iyo takhasusyo kale oo badan.

Baaritaankaaga Walbahaarka waxaa la muraajacayn doonaa 3-5 maalmood gudahood oo maalmaha la shaqeeya ah markaad foomka su'aalaha si dhamaystiran uga soo jawaabtid ka dib. Iyadoo loo fiirinayo jawaabahaaga, waxaa laga yaabaa in ballan la socosha ah lagu sameeyo si aad ula kulantid xubno ka tirsan kooxda daweynta.

Fadlan booqo [Cancer Education Blog \(Bogga Tacliinta Kansarka\)](#) ee ku yaalla Mayo Clinic Connect si aad wax uga ogaatid sida ay Xarunta Tacliinta Kansarka ee Qoyska Stephen iyo Barbara Slaggie ay bukaanka kansarka qaba iyo dadka caawiya ee ku sugan dhammaan xarumaha Mayo Clinic u siiso tacliin iyo taageero bilaash ah .

Marba haddii aad dareentid inaad waxyeello u geysanaysid naftaada iyo dadka kaleba, fadlan wac 911 si dhakhso laguugu caawiyo.

Annagu waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawinno. Waad ku mahadsantahay in aad daryeelkaaga Mayo Clinic ku aamintay.

Kooxdaada caafimaadka